

QIDMOOYINKA MACMIILKA IYO QIIMOOYINKA LAGA DHIMAY HOWLAHA GALABKA DUGSIGA

Qidmada macmiilka

100 yuuro / Bisha oo howlaha illaa 16:00 ama

120 yuuro / Bisha oo howlaha illaa 17:00

Gudaha Agoosto bar ka mid ah qidmada bil-laha waa la soo rasiid diray iyo **gudaha Juun** ma jiraan qimdooyinka la soo rasiid diray ee maalmaha howsha.

Ma jiraan qiimo dhimis la bixiyay deyrta, Kirismaska ama qaboobaha –waqtiyada fasaxa.

Haddii canuga uusan ka qeybgalin howlaha galabka

...sababtoo jiro oo 11 maalmood ama ka badan oo gudaha bisha kaleendarka, qidmada bil-laha waa la kala jari karaa. Qoraalka jirada ee ka imaatay dhaqtarka ama kalkaalisada waa in la keenaa.

... haddii canuga ka maqnaado sababtoo ah jiro oo bisha kaleendarka buuxdo, ma jiraan qidmada bil-laha oo lagu soo dalacayo. Qoraalka jirada ee ka imaatay dhaqtarka ama kalkaalisada waa in la keenaa.

...masuulka waa inuu soo ogeysiiyaa macalinka kooxda xili hore oo jiro walba ee la xiriirto maqnaanshaha canuga ee bisha kaleendarka buuxo. Xaaladahaan bar ka mid ah qidmada bil-laha ayaa lagu soo dalacaa.

Haddii masuulka rabo inuu badelo waqtiyada howsha maalinlaha (16:00 ama 17:00), adeeg bixiyaha waa in lagu soo ogeysiiyaa qoraal ahaan ugu yaraan hal bil oo kalendarka ah ka hor inta aysan badelka dhicin.

Haddii qidmada bil-laha aan la bixin taariiqda la gaaray, danaha lacag bixinta soo daahday waxaa loo aruurin karaa sida lagu sheegay Xeerka Xiisaha. Haddii lacag bixinta aan la helin gabi ahaanba, waxaa lagu aruurin karaa dhinaca nidaamka soo kabida deynta.

Codsashada qidmooyinka la dhimay

Foomka codsiga waxaa loo diraa guriga isaga oo ku lifaaqan warqada go'aanka. Qidmada la dhimay waxay xadeysaa jadwalka daqliga guud ee ka bilow 1.3.2017 illaa ka sii dambeyso:

Tirada xubnaha qoyska	Ma jiraan qidmada macmiilka ee lagu dalacay xadeynta daqliga (Yuuro)	Qidmada macmiilka waa lakala jaraa xadeynta daqliga (Yuuro)
2	2150	3292
3	2202	3599
4	2395	4057
5	2533	4195
6	2670	4332

Qidmada la dhimay waxaa la codsan karaa kadib helitaanka rasiidka koowaad.

Qidmada la dhimay ee simistarka deyrta waxaa la codsan karaa ugu dambeyn 31.12. Go'aanka waxaa la sameeyaa ugu badnaan sannad hal howl ah waqtigiiba. Wixii simistarka gu'ga kaliya codsiga waa in la gudbiyaa xiliga 31.5.

Codsiga qidmada la dhimay wuxuu u baahanyahay lifaaqyo:

foomka codsiga la saxiixay, go'aanka wanaagsan ee meesha howsha galabka ee canuga, koobiyada rasiidyada macmiilka iyo koobiyada xaqiijinta rasiidka

QIDMADA CUNTADA FUDUD EE HOWSHA GALABKA GAROONKA IYO KA DHAAFIDA QIDMADA

Ka dhaafida qidmada waxaa lagu codsan karaa foomka codsiga saxiixan oo ay la jiraan waraaqaha ku lifaaqan ee daqliga iyo qarashaadka. Haddii dhimista loo codsado dib u celin, waraaqaha waa inay noqotaa muddada waqtiga la codsaday.

Sida daqliga waxaa lagu qorayaa dhammaan daqliga saafiga ah ee qoyska, iyo sida qarashaadka waa dalacaadyada kirada/dayactirka la xisaabiyay, dalacaadyada korontada iyo biayaha, danaha barashada deymaha ama lacagta guriga, qeybta fadhiga faa'idada dheeraadka ah. Sida qarashaadka aan loo xisaabin tusaale ahaan deynta muddada la gu bixiyo, qidmooyinka caymiska, rasiidka taleefonka ama soo kabida deymaha.

Codsiyada la jiraan lifaaqyada loo baahanyahay waxaa loo dirayaa:

Helsingin kaupunki, Kasvatus ja koulutus, asiakasmaksut ja laskutus,
koululaisten iltapäivätoiminta, PL 51301,
00099 Helsingin kaupunki
Visitation address: Töyänkatu 2 D